Hogaanka Waxabarashada ee Qoysaska

Warbaxin kooban oo Ilmaha inay ogaadaan ay tahay iyo inay awoodi karayaan inay sameyn karaan iyo sida Qoysasku u kordhin karayaan Ku barashada Guriga.

"Waxaanu aaminsanahay Qoysasku inay Waalidiinteena yahiin. Waxaa weeyaan quwada ugu horeysa uguna xooga badan ee wax bara Ilmaha. Inagoo isku duuban waxaan hubinaynaa inay ardadoo dhan guuleystaan."

—Superintendent Emmanuel Caulk,
Portland Public Schools

Waxyaalaha ku saabsan Hogaaminta waxbarashada:

Hogaamintaan wax Barashadu waxey u taagantahay waxyaabaha Muhiimkaa ee ilmaahagu inuu ogaado ay tahay uuna awoodo inuu sameyn karayo luuqada ingiriiska aqriska iyo qoraalka dhamaadka iskuulka. Barashada Arimaha muhiimka ama ka guulgarida waxey Qoysaska iyo macalimiinta ka caawinayaan inay ogaadaan marka ardadu u baahanyahiin Caawimida dheeraadkaa iyo markeey u baahanyahiin wax ka sii yara adag oo ka badan waxey baranayaaan.

Maxay Qoysasku sameyn karayaan?

Waxyaalo badan ayaad ku caawin kartaa ilmahaaga xaga Barashada si aad uga caawiso isku diyaarinta mustaqbalkooda. Waa kuwan waxyaalo xoogaa oo ka caawinaya Ardayga xaga waxbarashada:

1. U sheeg ilmahaaga inay wax barashada kuu tahay Muhiim. U sheeg waxbarasha waa helitaanka Guusha.
2. Ha kuu ahaado Iskuulka waxa kuguu horeya. Taga iskuulka waqtigiisa saxda ha ka daahina maalin kasta.
3. Wdajir ula shaqee, ixtiraam shaqalaaha Maamulka iyo macaliminta Iskuulka.
4. Ku dhiiri gali inuu iskiis wax u qabsado, u ogolow ilmahaaga inay qalad sameyn karaan Aqbalna inuu wax kala dooran karo.
5. Kala hadal ilmahaaga wax aka dhacaya iskuulka.
6. La hadal macalinka ilmahaaga si aad u hubiso ilmahaaga horumarkiisa uu sameeyay sanad dugsiyeedka.
7. Imoow wada kulanka macalimiinta iyo waalidka iyo munaasabadaha kale ee iskuulka ka socda markay suurtogal kuu tahay.
8. Waxaad xaq u leedahay inaad ogaato Ilmahaaga sida uu yahay, ha ka gaban inaad la xariirto macalimiinta ilmahaaga hadii aad su'aal qabto.

La hadalka macalinka ilmahaaga

Waa muhiim inaad la hadasho macalinka ilmahaaga kana warqabto iskuulka arimaha ku saabsan ilmahaaga horumarkooda taasi oo la xariirta goolasha waxbarashadooda. Kuwaan ayaa ka mid waxyaalaha looga baahanyahay inaad ka wada hadashaan.

- Si fiican ugu kuurgal barnaamijkaan Hogaamintaan waxbarashada oo waydii meesha ilmahaagu ama cunigaagu ku xooganyahay ama ku wanaagsanyahay iyo meesha ay u baahanyahiin inay ku sii horumaraan.
- Waxaa kaloo lagu sii darayaa goolasha waxbrashada ee hogaamintaan, Miyeey jiraan Goolal kale ee aad ilmahaaga ka fileyso inay ku sii wanaagsanadaan?
- Waydii inaad aragto ilmahaaga shaqadooda ama waxyaalaha ay sameeyaan iyo siday u asiibeen ama aysan wali u gaarin meeshii looga baahnaa goolalkooda.
- Waydii sida ilmahaagu cabirka horumarkoodu yahay Sanad dugsiyeedkii.

- Waydii hadii ilmahaagu ay heerkii laga rabay yahiin xaga waxbarashada. Hadii aysan gaarin maxaa iskuulka ku caawimayaa si ay u gaaraan? Maxaad guriga ku caawin kartaa?
- Waydii in ilmahaagu uu gaaray meeshii laga rabay amaba uu ka sare maray xaga waxbarashada. Hadii ay saa tahay maxaa kale ee iskuulka u qabanayaa? Maxaa guriga u sameyn kartaa?

La hadlida Ilmahaaga

"Iskuulka side buu ahaa manta?"
"Fiican."
"Maxaad sameysay?"
"Waxba"
Midaasi miyay caadi tahay? Waa Cadi Sii waydii! Ardada Waalidkood Iskuulka kala hadlaan Iskuulka way ku wanaagsanyahay. Waa kuwanaa habab aad ilmahaaga kula xirmi karto oo aad ku caawin karto si uu u najaaxo:

- Sameyso waqti aad kala hadasho ilmahaaga Iskuulka maalin kasta.
- Waydii ilmahaaga inuu kuu sheego hal wax ay ku barteen Iskuulka manta. Maxaa aad u xiisa galinayay? Maxaa ku adkaa?
- Fiiri warqadaha iyo masawirada ama mashruucyada uu ka keenay iskuulka. Waydii ilmahaaga. Waydii ilmahaaga inuu kuu sheego si waadax ah maxay tahay waxbarashadu?
- Abaay marin sii ilmahaaga sida uu u galiya waqti badan uuna si adag u shaqeeyay "sida jawaabta saxda ah".
- Waydii su'aalo wax ilmahaagu ku fakarayaan: Sidee ku ogaatay taas? Maxaad u maleyneysaa? Maxaad u maleyneysaa? Maxaad Yaqiinsatay? Maxaa sidaasi u sameyneysaa? Miyeey jirtaa si kale aad ku heli karto Jawaabtaas?

Caawimida Waxbarashada meelaha iskuulka ka baxsan

Waxbarashadu waa inaysan istagin marka ardadu iskuulka ka tagaan. Ardadu waxay waqtiga badan dhumiyaan markay iskulka dibadisa joogaan marka loo eego markay joogaan iskuulka. Waa kuwanaa Qaabab xoogaa ah eed aad ku caawin karto ilmahaaga markay iskuulka dibadiisa joogaan:

- U aqri cunugaaga, La aqri Ilmahaaga, Kuna dhiirigali Qoyska inuu lahaado waqtiga Aqriska Luuqada markaas aay isleedahay waad ku wanaagsantahay.
- U habee Meel aad u dagan oo aan shanqadh lahayn ee uu ilmahaaga ku sameeyo home waagiisa iyo mashruucyada kale eek u saabsan waxbarashada.
- Isku day inaad u dajiso jadwal caadiya ee lagu sameyo Home-waaga iyo shaqooyinka kale.
- U isticmaal Tilmaan hagidaan inuu ku feejignaado goolasha waxbarasho, Isku day Qorshe dajin waxbarasho ee guriga.

Muxuu ilmahaagu u baahanyahay inuu barto ama ogaado dhanka aqriska iyo qoraalka:

Luqada

- ❑ Inuu fikraddiisa ka dhiiban karo buug, sheeko ama maqaal uu akhriyey isagoo isticmaalaya faahfaahin uu ku taageerayo fikraddiisa.
- ❑ In uu sheegi karo macnaha erayada halhayska ah (ereyo tilmaamaya macne kan ka muuqda ereyayada laftooda) sida “a drop in the bucket” (Dhibic baaldi ku dhacday: oo loola jeedo wax yar) ama “a piece of cake” (Qurub keeg ah: oo loola jeedo waa wax dhib yar)
- ❑ In uu garto macnaha ereyo ku cusub isagoo isticmaalaya aqoontiisa ereyada horgalyaasha ah ee caanka ah sida (de-, ex-, and pre-) iyo kuwa gadaal hadalka ka raaca sida (–er, -ly, and –ous).

Akhrinta Suugaaneed

- ❑ In uu kala sooco fal iyo sababta keeentay falka isagoo isticmaalaya buug ku saabsan sheeko khayaali ah.
- ❑ Inuu garan karo ula jeeddada (dulucda) casharrada, sheekooyinka dhabta ah iyo sheeko xariirta.
- ❑ Inuu garto dhawaaqa, qaafiyadda, ereyada soo noqnoqda, isu ekaanshaha, hal qabsiga iyo qofaynta gabayada.

Qoraalka

- ❑ Inuu ardaygu si faahfahsan u fikraddiisa isagoo isticmaalaya sharaxaadda casharka lagala soo baxay oo ardaygu fikirkiisana ku kordhiyo.
- ❑ Inuu ururiyo warbixin meelo kala duwan laga soo xigtay isla markaana si kooban uga faalloodo xogta la soo ururiyey isagoo ardaygu isticmaalayo ereyo uu leeyahay iyo isku-habayn qeexan.
- ❑ Inuu qoro sheeko ay ku jirto wada hadal, faahfaahin, shakhsiyaadka sheekada iyo dhacdooyinka.

Barasha aqriska iyo qoraalka ee guriga

- ❑ Ka caawi ilmahaaga inuu ururiyo halhaysyo sida, “Don’t count your chickens before they hatch,” (ha tiring digaaggaaga inta aanu ukuntaba ka dillaacin oo loola jeedo: Shay aan la gaarin faa’iidadiisa ha xisaabsan), iyo “It’s raining cats and dogs.” (waxa soo da’aya roob ay iyo bisado ah, oo loola jeedo: Roob culus baa da’aya) Kala sheekayso imahaaga waxa halhaysyadaa loola jeedo.
- ❑ Akhri sheeko aan dhab ahayn (sheeko xariir, sheeko dhaqameed iwm), waxa kale oo aad akhrida sheeko dhab ah iyo gabayo.
- ❑ Kala sheekayso dulucda sheekooyinka marka uu akhriyo sheeko khayaali ah. Kala sheekayso waxaad ka barateen labadiinnuba marka uu akhriyayo sheeko dhab ah. Marka ilmahaagu uu akhriyayo gabay, kala sheekayso sida gabayaagu u isticmaalo erayo si uu u muujiyo dhacdo.
- ❑ Kala sheekayso waxa ilmahaagu ka barto Sayniska. Dhugo wax ilmahaagu xiiseeyo, sida xayawaanka isticmaala midab baddalka si ay u dhuuntaan oo kale, kala raadi internetka iyo maktabadda macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mawduuca ilmuhu xiisaynayo.

Notes:

Fadlan la xariir Macalinka ilmahaaga si aad u waydiiso Barnaamijyada wax aqriska iyo qoraalka iyo Xisaabta meelaha laga heli karo.

Muxuu ilmahaagu u baahanyahay inuu barto ama ogaado dhanka xisaabta:

- ❑ Tus sida isku dhufashada iyo qaybintu macno ugu samaynayso nolol maalmeedka adigoo isticmaalaya habab kala duwan, sida shaxda (tiro iyo walxo saf u yaalla), fikir xisaab ah oo caqli ku dhisan, iyo aqoonta xisaabta ee aasaasiga ah.
- ❑ Sii wad inaad ardayga kala shaqayso barashada xisaabta ilaa 10,000 iyo wixii ka sareeya. Isticmaal aqoontan marka aad isu geynayso, kala goynayso ama aad is-barbar dhigayso tiro waaweyn.
- ❑ Fahanka jajabta inay tahay hal la qaybiyey, ama xubno la isu geeyey.
- ❑ Fahanka xisaabta jajabta iyo jajab tobanleyda, sida 3⁄4 and .75.
- ❑ Isticmaalka qurubyada iyo garaafka si loogu muujio xaalado isbeddelaya. *Tusaale ahaan: xisaab banki oo todobaadkiiba ay ku korodho $2.00.*
- ❑ Garashada iyo faahaahinta shaxanada laba dhinaclaha ah. *Tusaale ahaan: inta dhinac ee uu leeyahay, dhinacyada isbarbar socda, ama xaglaha afar geesyada.*
- ❑ Garashada qaababka saddex dhinaclaha ah. *Tusaale ahaan: wajiyada xagalaha.*
- ❑ Go'aansashada baaxadda xaglaha iyadoo laga tixraacayo xagal qumman (90-digrii). *Tusaale ahaan: xagal 30-digiir ah I waa 1/3 xagal 90-digrii ah.*
- ❑ Goo'aansiga badadda iyo wareegga shax laba dhinacle ah.
- ❑ Uruurinta, cabbirka iyo qiimaynta xisaabta.
- ❑ Is barbardhigga laba qaybood oo xisaab ah.

Barasha Xisaabta ee Guriga

- ❑ Xallinta su'aalaha isku-dhufashada ah. Weydii ilmahaaga sida ay u garteen jawaabta xisaabta isku-dhifashada ah. Is-barbar dhig siday u kala duwan yihiin sidaad jawaabtaada u heshay. Weydii inay si kale jawaabta u heli karaan. Isla fiiriya siyaabo kale oo aad su'aalo kale uga jawaabi.
- ❑ Fiiri shaxanno ku yaalla joornaallada iyo majalladaha iyo alaabooyinka maalin walba lala kulmi karo. Kala hadal ilmaha in walxahaasi ay leeyihiin xaglo quman (90-digrii ah), ama ay ka badan yihiin 90 digrii.
- ❑ Ilmahaaga ku imtixaan inay heli karaan badadda miis dushiisa, roog iwm. Inta aan ilmuhu cabbirin waxa marka hore aad labadiinnuba qiyaastaan in cabbir ahaan ay noqon karto, dabadeedna jawaabta iyo saadaashii isla fiiriya.
- ❑ Markaad aad cuntada karinayso, ilmahaagu ha sheego cuntada waxa la isaga geeyey, hana sheego jajab ahaan siday isugu qiyaasan yihiin. Weydii ilmaha cabbirka shaygiiba inta aad uga baahan tahay haddii aad rabto inaad cuntada laban laabto.
- ❑ Samee garaaf xilliga qorraxdu dhacdo ama soo baxdo Portland adigoo isticmaalaya xogta ku taal joornaallada ama internetka.

Notes:

Fadlan la xariir Macalinka ilmahaaga si aad u waydiiso Barnaamijyada wax aqriska iyo qoraalka iyo Xisaabta meelaha laga heli karo.

PORTLAND PUBLIC SCHOOLS
Academics Office
353 Cumberland Avenue
Portland, Maine 04101
207.874.8100
portlandschools.org

Warbaxintaan ama Qoraalkani waxaa soo saaray Dugsiyada Dadweynaha ee Degmada Portland. Qoraalkaan waxa la isticmaalay waxna laga badalay iyadoo fasax laga heysto Dugsiyada Dadweynaha ee Boston. Waxa jira oo kale qoraal kale eek u saleysan howlaha uu qabtay Dr Anthony L. Moore.

Created spring 2014

Somali